

Hanaanka Isqorista

Soo ururi macluumaadkan

- Dhukumenti caddeyn u ah da'da (shahaado dhalasho, baasaboor ama dhukumenti lamid ah)
 - 2 dhukumenti oo xaqiijin u ah cinwaanka. Tusaalayaasha waxa kamid ah heshiisyada amaahda guryaha, heshiiska kirada, biilasha adeegyada guriga (taas oo ku taariikhaysan 30 ka maalmood ee ugu dambeeya wakhtiga isqorista), caymiska ama bayaanka kaalmada dawladda.
 - Magaca dawladda, cinwaanka guriga iyo taariikhdu waa inay muuqdaan
 - haddii aanad bixin karayn laba caddeymood oo cinwaanka ah, la xidhiidh Xarunta Qorista iyo Gudbinta
 - Diiwaanada tallaalka
 - Macluumaadka Shuruudaha Tallaalka ee heerka fasalka waxa laga heli karaa [websayta Adeega Tallaalka Degmada ee Waxbarashada Multnomah](#)
 - Macluumaadka Baadhitaanka Caafimaadka Ilkaha iyo Aragtida (Keliya da'da 7 sano jirka iyo wixii ka yar)
 - Macluumaadka xidhiidhka xaaladda degdega ah
 - Macluumaadka xidhiidhka dugsigii hore (looma baahna bilawga Xanaanada)
-

Hanaanka isdiiwaangelinta onlaynka ah

Booqo www.pps.net/enroll. Abuur Koontada Isdiiwaangelinta ee Onlaynka ah. Ku lifaaq dukumiintiyada xaqiijinta cinwaanka. Buuxi isdiiwaangelinta onlaynka ah oo guji gudbi. Xoghaynta dugsigu wuxuu la xirii doonaa waalidka/mas'uulka sharciga ah ee wax diiwaangalinaya si uu u ururiyo diiwaanka/foomka CIS ee tallaalka una xaqiijiyo caddeynta da'da; sidoo kalena uu u ururiyo wixii macluumaad ah ee maqan ee lagama maarmaanka u ah dhammeystirka hanaanka qorista.

Xusuusin: Isdiiwaangelinta onlaynka ahi waxay ka diiwaangelin doontaa ardayga dugsiga loo qoondeeyay cinwaanka guriga. Si aad u xaqiijiso dugsiga, booqo www.pps.net/Page/2379 oo ku qor cinwaanka Helaha Dugsiga (School Finder).

Hanaanka isdiiwaangelinta ee warqadda ah

Buuxi foomamka warqadda ah una gudbi xoghaynta dugsigaaga iyadoo ay la socdaan dhammaan dukumiintiyada loo baahanyahay.

Xirmada isdiiwaangelinta waxaa ku jira:

- Foomka isdiiwaangelinta
- Caddeynta da'da
- 2 caddeymood oo cinwaanka guriga ah
- Diiwaanka tallaalka
- Foomka Baadhista Aragga iyo Ilkaha, haddii ay khuseyso